

SHURUUDAHA LAGA RABO QOFKA DOONAYA MULKIYADA LAHAANSHAHA DHULBEEREDKA QOYSKA/SHAQSIGA

1. Cadaynta ama formka qabalaha oo gudiga maamulka qabaluhu saxeexeen.
2. Warqad degmada ka soo baxday taas oo ay ku cadahay magaca mulkiilaha beerta iskaleh ,baaxadda, jihooyinka iyo magacyada mulkiilayaasha beeraha madaha/xuduuda ay wadaagaan.
3. Warqada aqoonsiga qabalaha iyo labo sawir
4. Foojarka gibirka ama cashuurta dhulka lagu bixiyay oo waafaqsan bayaanka cusub
5. Waa in beerta laga soo qaadaa GPS Coordinate ka /cabirka baaxadda beerta taas oo ay goob-joog ka yihiin mulkiilayaasha beeraha iyo mulkiilayaasha beeraha ay madaha wadaagan ama jaarkayihiin
6. Haddii ay jiran cadaymo dheeri ah sida go aan max kamadeed iwm.

SHURUUDAHA LAGA RABO QOFKA DOONAYA MULKIYADA LAHAANSHAHA DHULBEEREDKA MAALGALINTA

1. Cadaynta ama formka qabalaha oo gudiga maamulka qabaluhu saxeexeen.
2. Warqad degmada ka soo baxday taas oo ay ku cadahay magaca maalgaliyaha shirkada beerta iskaleh, baaxadda, jihooyinka iyo magacyada mulkiilayaasha beeraha madaha ay wadaagaan.
3. Maalgaliyuhu waa in uu xafiiska maalgalinta ka keena warqada ama cadaynta ogolaanshaha maalgalinta dhulbeereedka
4. Maalgaliyuhu waa in uu ka keenaan warqada wargalinta ah ee ka soo baxday xafiiska maalgalinta kuna socota xafiiska ilaalinta deegaanka iyo maamulka dhulka miyiga.
5. Waa in ay keenan warqada lambarada aqoonsiga cashuur bixiyaha / tin number (taxpayer identification numbers) ee xafiiska dakhliga
6. Shaatiga ganacsi (business licence)
7. Warqada aqoonsiga qabalaha iyo labo oo maareeyaha shirkada ah
8. Foojarka gibirka ama cashuurta dhulka lagu bixiyay oo waafaqsan bayaanka cusub
9. Waa in beerta laga soo qaadaa GPS Coordinate /cabirka baaxadda beerta taas oo ay goob-joog ka yihiin mulkiilayaasha beeraha iyo mulkiilayaasha beeraha ay madaha wadaagan ama jaarkayihiin.
10. Qorshaha guud ee maalgalined (business plan) ka shirkada
11. Haddii ay jiran cadaymo dheeri ah sida go aan max kamadeed iwm.

SHURUUDAHA LAGA RABO QOFKA DOONAYA MULKIYADA LAHAANSHAHA DHULBEEREDKA ISKAASHATADA

1. Cadaynta ama formka qabalaha oo gudiga maamulka qabaluhu saxeexeen.
2. Warqad degmada ka soo baxday taas oo ay ku cadahay magaca maalgaliyaha iskaashatada beerta iskaleh, baaxadda, jihooyinka iyo magacyada mulkiilayaasha beeraha madaha ay wadaagaan.
3. Waa in ay xafiiska iskaashatooyinka ka keenaan shahaadada iskaashatada oo la cosboonaysiiyay.
4. Waa in ay keenan warqada lambarada aqoonsiga cashuur bixiyaha / tin number (taxpayer identification numbers) ee xafiiska dakhliga
5. Iskaashatadu waa in ay layimaadaan warqada aqoonsiga qabalaha ee shanta (5) xubin ee gudiga
6. Foojarka gibirka ama cashuurta dhulka lagu bixiyay oo waafaqsan bayaanka cusub
7. Waa in beerta laga soo qaadaa GPS Coordinate /cabirka baaxadda beerta taas oo ay goob-joog ka yihiin mulkiilayaasha beeraha iyo mulkiilayaasha beeraha ay madaha wadaagan ama jaarkayihiin.
8. Waa in ay keenaan xeerhoosaadka iskaashatada oo dhamaystiran.
9. Haddii ay jiran cadaymo dheeri ah.

FG. Fadlan Keen Dhammaan Dukumeentiyada Asalka ah (Orginal) iyo Kuwa Nuqulka ah (Copy)

FIIRO GAAR AH:

- Dhulbeereedka loo duwaangalinayo isticmaalayaasha si ay u helaan xaqqa lahaanshaha waxa ka reeban dhulka khilaafku ka jiro tusaale sida dhulka dhaxalka ah ee aan laqaybin wali iyo dhulka is riix-riixu ka jiro.
- Dhulka khilaafkaasi ka jiro wax warqada looma soo qori karo ilaa ay nidaamka sharciga ku kala baxaan.
- Warqadaha dagmooyinka laga soo qorayo waxa soo saxeexi kara oo kaliya gudoomiyaha degmada ama madax xafiiseedka beeraha waxa ka reeban kusime, hadii laga maarmi waayo waa in uu isticmaalaa title ka ama shaanbada booska uu kusimaha ka yahay.
- Hadii beero khilaaf ka jiro warqadaha loo soo qoro waxa masuuliyadaa qaadan doona masuulka degmada ee soo qoray.
- Soo qaadida GPS Coordinate ka/cabirka baaxadda beerta waxa ma suuliyadaa iska leh xafiiska ilaalinta deegaanka iyo maamulka dhulka miyiga gaar ahaan shaqaalaha waaxda maamulka iyo isticmaalka dhulka miyiga
- Aan ilaalino shuruucda maamulka iyo nidaamka habsami u isticmaalka dhulka iyo iskudheelitirka xaqa iyo xuquuda dumarka (Gender Equality)